

Bristol Community Safety Partnership

Dib-u-eegista Dilka Qoyska Dhexdiisa [ka Dhaca] (Domestic Homicide Review)

**Warbixin kooban oo ku saabsan dilkii Idil Ahmed (maaha
magaceeda dhabta ah)**

Executive Summary Into the Death of Idil Ahmed (pseudonym)

David Warren QPM, LLB, BA. Dip.NEBSS

**Guddoomiye Madaxbanaan oo Dib-u-eegaya Dilka Qoyska ka Dhexdhaca
(Independent Domestic Homicide Review Chair)**

Warbixinta waxa la dhameeyaya: 8dii September 2016

Guddiga Dib-u-eegaya Dilka Qoyska Ka Dhexdhacay

David Warren:	Home Office Accredited Independent Chair
Gary Stephens:	Avon and Somerset Constabulary
Andrew Corp:	Bristol City Council – Housing Solutions
Alice Brisbane:	Bristol City Council - Single Point of Access (Housing)
Amy Campbell:	Bristol City Council – Public Health
Sarah Taylor:	Bristol Community Health
Jackie Beavington:	Bristol City Council – Public Health (Chair of DVSA Strategy Group)
Paulette Nuttall:	Bristol Clinical Commissioning Group
Allason Hunt: (BGSW CRC)	Bristol Gloucester Swindon and Wiltshire Community Rehabilitation Company
Kenny Chapman:	Immigration Enforcement
Linda Mellow:	Next Link
Gwen Bennion:	The Meriton School
Leena Analyse:	University Hospital NHS Foundation Trust Bristol

La Taliyaha Gaarka ah ee Guddiga

Mohammed Elsharif: Bristol City Council - Public Health

Sarkaal Saree e Kiiska Baadhay

Detective Chief Inspector Mike Williams: Avon and Somerset Constabulary

Maareynta iyo Maamulka Dib-u-egista (Review Administrator)

Mark Parry: Bristol City Council

Qaybta Koowaad: Hordhac (Introduction)

1.1. Dib-u-eegistani waxay baadhaysaa hay'adaha Bristol ee ay Idil Ahmed (maaha magaceeda dhabta ah) la macaamishay ama wax u qabtay dhimashadeeda ka hor July 2015. Idil, waxay ahayd 22 jir markii ay dhimatay, waxayna Bristol la deganayd saygeeda Geedi Aadan (maaha magiciisa dhabta ah) oo la rumaysanyahay in markaa da'diisu ay hayd 21 sannadood.

1.2. Xaaladaha la xidhiidha Idil dhimashadeedu waa:

1.2.1. Qiyaastii ama goor ay saacaddu ku dhawayd 6.58pm maalintii ay dhimatay ciidanka amaanku (police) waxay telefoon 999 ka heleen Geedi oo sheegay in uu isla markaa dilay xaaskiisa iyaga oo guriga jooga.

1.2.2. Saraakiil ka tirsan ciidanka amaanka oo labisan (Uniformed Police Officers) ayaa wakhti yar kadib yimid, waxayna arkeen Idil oo qolka fadhiga (ama qolka aan hurdada ahayn ee la wada isticmaalo) weliba dhulka taala (ama wadhan), waxayna xidhnayd surwaal iyo keeshali kelya, waxaana ka muuqday dhaawacyo midiyeed aad ah. Caafimaadka kaalmada degdega ah (paramedics) ayaa yimid laakiin markay saacaddu ahayd 8.10pm ayaa lagu dhawaaqay in ay naftu ka baxday.

1.2.3. Mindi weyn oo kuwa madbakha ah ayaa guriga madbakiisa, halka weelka lagu maydho (kitchen sink) laga helay; laba mindiyood oo kale oo midi ay jabnayd kuna jirtay daasadda xashiishka ee madbakha (kitchen dustbin) ayaa iyana la helay.

1.2.4. Ugu horeyntii Geedi ayaa qirtay. Si kastaba ha ahaatee, markii dambe ee waraysiga laga qaaday ee su'aalo la weydiiyay wuxuu yidhi waxba kama xusuusto wixii uu sameeyay. Waxa kale oo uu sheegtay caafimaad darro dhinaca maskaxda ah, wuxuuna muddo ku jiray dhakhtarka caafimaadka maskaxda ilaa iyo intii la sugayay, lana samaynayay baadhitaano caafimaadka maskaxda la xidhiidha. Kadib waxa la cadeeyay in uu awoodo in uu dacwad maxkamadeed ka bixi karo, waxaana lagu helay in uu dil gaystay. Waxa lagu xukumay xabsi daa'in (life imprisonment), waana in uu ugu yaraan ku jiraa labaatan sannadood ka hor intaan loo ogolaan in guddiga racfaanku dhagaystaan.

1.2.5. Idil waxay lahayd uur saddex bilood ah, Geedi ayayna uurka u lahayd. Badhitaankii lagu sameeyay Idil jidhkeeda kadib markii ay dhimatay ama intii aan la aasin, waxa lagu ogaaday in shan jeer mindi qoorta lagaga dhuftay oo dhaawac kaga yaalay, shan jeer oo kalena dhabarka lagala dhacay oo laga dhaawacay, hal dhaawac ayaa bawdada midig kaga yaalay iyo dhaawac kale oo gacanta midig xageeda sare kaga yaalay. Dhaawacyada dartood, labadeeda sambabadood waxay noqdeen hawlgab ama may shaqaynayn.

1.2.6. Idil iyo Geedi waxay isku lahaayeen inan yar oo markaa afar jir ahayd. Bilan (magaceeda dhabta ah maaha). Wakhtigaa ay dhacdadu dhacaysay guriga (flat) way ka maqnayd, waxayna la joogtay ayeeydeed oo xaafad kale Bristol ka degan.

Qaybta Labaad: Habka Dib-u-eegista (The Review Process)

2.1. Warbixintan koobani waxay qeexaysaa habkii ay mareen Guddiga Bristol ee Dib-u-eegista Dilka Qoyska Dhexdiisa ama qoyska ka dhex dhaca (Bristol Domestic Homicide Review Panel) markii ay dib-u-eegayeen xaaladaha ku geedaaman ama la xidhiidha dilkii Idil.

2.2. 25kii August 2015 Bristol Community Safety Partnership waxay go'aansadeen in ay sameeyaan dib-u-eegis ku saabsan dilka qoyska ka dhexdhaca (Domestic Homicide Review), waxaana 3dii September 2015 la ogeysiiyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Home Office).

2.3. Hawlgalku wuxuu bilowday 26kii November 2015, waxaana lagu bilaabay kulan hordhac ah oo Guddiga Dib-u-eegistu (Review Panel) ay la yeesheen dhamaan hay'adaha suurtoogalka ah ee wax u qabtay ama la xidhiidhay dhibanaha, Idil ama dembiilaha, Geedi. Sida dusha lagu sheegay dib-u-dhicii ku yimid dembiga dacwadda (para.1.2.4.), Dib-u-eegista dib ayaa loo dhigay ilaa 14ka July 2016 iyadoo Wasaaradda Arrimaha Gudaha lagala heshiiyay.

2.4. Idil qoyskeeda iyo asxaabteeda ayaa ka qaybqaatay Dib-u-eegista Dilka Qoyska Dhexdiisa, si toos ah (face to face) iyo waraysiyo telefoonka lagaga qaaday iyo hadaladii ay ciidanka amaanka u sheegeen. Idil hooyadeed iyo walaalkeed (oo ay xagga hooyada ka walaalo yihiin) ayaa 3dii August 2016 la kulmay Guddoomiyaha Dib-u-eegista Dilka Qoyska Dhexdiisa. Idil walaalkeed ayaa si buuxda u akhriyay dhamaan Warbixinta Dib-u-eegista. Guddoomiyaha Dib-u-eegista Dilka Qoyska Dhexdiisa ayaa Idil hooyadeed oo aan af-Ingiriisiga akhriyi Karin kor ugu akhriyay qaybta 12aad ilaa qaybta 16aad ee Warbixinta. Guddoomiyuhu wuxuu marka horeba ogaa in Idil hooyadeed ay ogtahay eedaymaha lagu sheegay 2.10.3, waxayna ku dartay in Idil ay u sheegtay in arrintaasi ay saddex jeer dhacday. Walaalkeed oo Warbixinta akhriyay, ayay ka muuqatay in uu ka xumaaday in ay qof qoyska ka mid ah waxaas oo kale ka sheegto. Wuxuu sheegay in uu fahmay waxay muhiim u tahay laakiin in ay qoyska diiqad iyo murugo badan u keeni karto haddii qofka dembigaa lagu eedeeyay magiciisa dibedda loo soo saaro. Sidaa daraadeed wuxuu codsaday in qofkaa qoyska ka mid ah aan magiciisa Warbixinta lagu sheegin. Waxa laga codsaday in ay soo qoraan qoraal ay Idil ugu deeqayaan oo Warbixinta Dib-u-eegista lagu daro laakiin codsigaa way diideen. Waxa kale oo lagu martiqaaday in ay yimaadaan kulanka ugu dambeeya ee Dib-u-eegista oo dhacayay 8dii September 2016 laakiin Idil hooyadeed waxay dareentay in ay murugo badan tahay, walaalkeedna wuxuu sheegay in aanu iman karaynin. Iyada oo af-celiye (ama tarjubaan) lala kaashanayo ayaa Idil hooyadeed la guddoonsiiyay Warbixinta oo dhan ka hor intii aan la dabaacin September 2017.

2.5. Geedi qareenkiisa ayaa qoraal ahaan iyo telefoonkaba lagula xidhiidhay. Ugu horayntii way ogolaatay in ay macmiilkeeda kala hadasho Dib-u-eegista iyo in ay weydiiso in magac been ah la siiyo (pseudonym) iyo in laga helo ogolaansho lagu eego waraaqaha xogta caafimaadkiisa (his medical records). Si kastaba ha ahaatee kadib markii qareenkiisu ay fasax-umuleed (maternity leave) u baxday, qareen kale oo shirkadda ka shaqaynayay ayaa diiday in uu xaqiijiyo in Geedi uu macmiil u yahay ilaa Dib-u-eegista Dilka Qoyska Dhexdiisa ay Geedi ka keenaan warqad ogolaansho ah oo saxeexan si shirkaddu ay u siiso macluumaadkaa laakiin taasi suurtoogal may ahayn waayo baadhitaanadii caafimaadka maskaxda ee Geedi dartood.

2.6. Kadib markii ay maxkamaddu dhamaatay Geedi xabsiga ayaa lagula xidhiidhay iyadoo la sii marayo maareeyihiisa Dembiilaha (Offender manager). Wuxuu ogolaaday in magac been ahi uu ku haboonyahay laakiin wuu diiday in uu saxeexo foomka ogolaanshaha (consent form) si Dib-u-eegistu ay u eegi karto waraaqaha xogta caafimaadkiisa, waayo wuxuu yidhi lamaan xidhiidhin wax adeeg caafimaad ah intii aan la i xidhin ka hor. Maareeyihiisa Dembiilaha (his Offender Manager) ayaa isaga xabsiga u geeyay Warbixinta Dib-u-eegista nuqulkeeda (a copy of the draft Overview Report) oo kala

hadlay natiijada ka soo baxday Dib-u-eegista. Wuxuu xaqiijiyay in dhawr magac loo yaqaanay laakiin taariikhda dhalashadiisu ay saxsantahay. Wuxuu yidhi guurkaygii Idil muu ahayn mid la isu kaayo dooray (arranged marriage), wuxuuse iyada kula kulmay Itoobiya (Ethiopia) Kadib markii uu ka soo noqday Kiiniya (Kenya) oo uu ka shaqaynayay shaqadii Kenya.

2.7. Hay'adaha Dib-u-eegista ka qaybqaadanaya waa:

Albany Solicitors

Avon and Somerset Constabulary

Avon and Wiltshire Mental Health Partnership NHS Trust

Bristol City - Children's Social Care

Bristol City Council – Housing Services

Bristol City Council – Public Health

Bristol Clinical Commissioning Group

Bristol Community Health

Bristol, Gloucestershire, Somerset, Wiltshire Community Rehabilitation Company (BGSW CRC)

Bristol Royal Children's Hospital

Home Office (UK Visa's and Immigration; Border Force; Immigration Enforcement)

Integrated Cleaning Management (ICM)

National Probation Service

Next Link

Teenage Pregnancy Midwifery Service

The Meriton School

University Hospitals Bristol NHS Foundation Trust

Victim Support Homicide Service

2.8. Hay'adaha waxa laga codsaday in ay ka warbixiyaan wakhtiyadii (ama taariikhiihii) iyo siday u kala horeeyeen ee ay la kulmeen dhibanaha iyo/ama dembiilaha dilka ka hor. Dhamaan waraaqihii muhiimka ahaa ee arrintan ku haboonaa waa la helay. Meelaha aanay hay'aduhu ku shaqo lahayn, ama shaqo aan muhiim ahayn la qabteen, Dib-u-eegista ayay sida ugu haboon u wargeliyeen.

2.9. Siddeed-iyo-tobanka hay'adood ee ay Dib-u-eegistu la xidhiidhay, toddoba ka mid ah ayaa sheegay in aanay xidhiidh (ama shaqo) muhiim ah la lahayn Idil ama Geedi. Sagaal hay'adood ayaa

buuxiyay Dib-u-eegis Maareyn Madax Banaan (Independent Management Review (IMR)) taasoo macluumaadku ay cadeeyeen in uu jiro xidhiidh (ama shaqo) heerar kala duwan ah. Hay'ad ayaa diiday in ay bixiso wax macluumaad ah iyadoo Geedi aanu ogolaansho bixinin, mid kalena Idil qoyskeeda ayay taageero u fidiyeen ama siiyeen.

2.10. Xogtii iyo xaqiiqadii laga helay IMRs, dhakhaatiirta caafimaadka maskaxda (Psychiatrists), Geedi iyo Idil qoyskeeda iyo asxaabtooda waxa loo soo koobay sida soo socota:

2.10.1. Idil waxay ku dhalatay Soomaaliya laakiin Itoobiya ayay ku noolayd ka hor intii aanay United Kingdom imanin 10kii March 2010 si ay ula noolaato hooyadeed iyo walaalaheed oo Bristol u soo guuray sannadkii 2008.

2.10.2. Idil waxay Geedi guursatay iyadoo shan-iyo-toban jir ah, waxayna isku guursadeen Soomaaliya ama Itoobiya bishii December 2009 iyadoo aan aqoon badan hore ugu lahayn.

2.10.3. 24kii May 2010 Idil waxa arkay dhakhtarka qoyska (GP) iyadoo ay hooyadeed la socoto. Xogta kaydka dhakhtarku waxay cadeeyeen in ay hooyadeed codsatay in la eego in ay uur leedahay (pregnancy test) inkastoo ay tidhii in aanay markaa cidna u galmoon. Idil waxay GPga u sheegtay in markii ay Itoobiya joogtay qof qoyska ka mid ahi uu faro xumeeyay laakiin aanu u galmoon. Waxa kale oo qornayd in aan la gudin (ama aan la xalaalayn), inkastoo markii dambe iyadoo shan-iyo-toban toddobaad uur leh la xaqiijiyay in la guday. Idil hooyadeed ayaa xaqiijisay in idil la guday, waayo waxay ahayd dhaqan caadi ka ha Soomaaliya ayay tidhi.

2.10.4. Baadhitaankii uurku wuxuu noqday mid togan (positive), waxayna Idil 27kii May 2010 GPga u sheegtay in ay Itoobiya ku guursatay nin Soomaali ah (Geedi Aadan) oo da' ahaan ka weyn. Waxay tidhi weli Soomaaliya ayuu joogaa iyo in ay telefoonka kula xidhiidho ilaa iyo intii ay UK timid. Idil aad ayay u murugootay, waxayna tidhi sababta ay guursatay waxay ahayd in mar hore qof qoyska ka mid ahi uu kufsaday, taasoo ay si dhab ah u yiqiinsatay waxa ay raggu yihiin, ayna go'aansatay in ay guursato. Way hubtay in saygeedu uu yahay aabaha ilmaheeda dhalay, markii dambena waxa xaqiijiyay baadhitaan DNA ah.

2.10.5. 6dii December 2010 ayay Idil umushay, waxaana dhalatay inateeda Bilan, kadibna waxa Bristol laga siiyay guri (flat) u dhow halka ay habaryarteed/eedadeed degantahay. Adeegyada Guryaha (Housing Support) ayaa siiyay taageero ku saabsan sidii ay dhaqaalaheeda u maareyn lahayd kadib markii ay muddo gaaban dabadeed kiradii bixin kari weyday.

2.10.6. 23kii July 2014 Idil waxay tagtay Talyaaniga (Italy), halkaasoo ay kula kulantay saygeeda Geedi oo Soomaaliya ka soo safray, soona maray Liibiya, kadibna doon ka soo raacay oo Talyaaniga si sharci darro ah ku soo galay. Waxay isaga la soo joogtay bil Ramadaan, waxayna England ku soo noqotay 21kii August 2014. Dhowr toddobaad kadib markii ay soo noqotay waxay booqatay GPga, waxaana la xaqiijiyay in ay uur leedahay, inkastoo markii dambe uu ka qoonmay (miscarriage).

2.10.7. 4tii March 2015 Geedi waxa laga dhex helay baabuurta xamuulka ee qaboojiyaha leh (refrigerated lorry) kaasoo markaa yimid nawaaxiga London, kana soo galay Calais. Magangelyo ayuu codsaday, wuxuuna sheegay in uu Soomaaliya ka yimid oo niman afka duubani ay gurigoodii soo galeen oo ay aabihii dileen. (Dhimashadii Idil kadib, markiii ay dhakhaatiirta caafimaadka maskaxdu waraysanayeen wuxuu sheegay in aabihii uu "walaanyahay" iyo in uu noolyahay oo uu Soomaaliya ku noolyahay.)

2.10.8. 6dii March 2015 saraakiisha laanta socdaalka (Immigration Enforcement) ayaa farihii laga qaaday ka soo cadeeyay in Geedi uu Talyaaniga soo maray, Wakefield ayaana guri laga dejiyay. 13kii

March 2015 qof ay qoyska saaxiib yihiin ayaa Geedi soo kaxeeyay, wuxuuna keenay Bristol si uu ula joogo Idil iyo inantooda Bilan.

2.10.9. Inkastoo Idil qoyskeeda intooda badani ay aaminsanaayeen in Idil ay ku faraxsanayd imaashaha Geedi ee England, gabadh ka mid ah hablaha ay asxaabta ahaayeen ayaa ciidanka amaanka u sheegtay in idil ay aad uga murugootay imaanshihiisa, waayo waxay ku talo jirtay in ay iska furto. Saaxibadeed waxay ku tidhi arrintan isaga waan u sharaxay markii ay Talyaaniga la joogtay. Saaxiibadeed waxay sheegtay in Idil ay aad uga amakaagtay in Geedi uu UK yimaado isaga oo aan iyada soo wargelin.

2.10.10. Geedi wuxuu Idil qoyskeeda iyo asxaabteeda uga sheekeeyay safarkii adkaa ee uu UK ku yimid iyo dhibaataadii ka soo gaadhay, Idil walaalkeed ayayna dhakhso u saaxiibeen. Geedi wuxuu isaga u sheegay lacag la'aanta haysa maadaama aan sharci ahaan loo ogolayn in uu shaqeeyo, wuxuuna ka cabanayay in Idil ay xusuusisay in guriga (flat) iyo wax kasta oo dhexyaala ay iyadu leedahay, taasina aad ayay u dhaawacday.

2.10.11. 12kii June 2015 waxa la xaqiijiyay in Idil ay mar kale uur leedahay.

2.10.12. Fiidnimadii Khamiista ee 23kii July 2015 Idil iyo Geedi waxay israaceen oo ay wada casho tageen mid ka mid ah animada ay Idil xagga hooyo ka walaalo yihiin iyo gabadh ay ilmaabti/ilmaadeer/habarwadaag yihiin. Geedi wuxuu u eekaa in uu wax ka cadhaysanyahay, laakiin Idil walaalkood wuxuu ka dhigay in uu xishoonayay. Habeenkii ku xigay, Jimce 24kii July 2015 afartooda ayaa Sinimaha (Cinema) isku raacay, Idil walaalkeed iyo inaabtideed/inaadeerteed/habarwadaagteed gooni ayay u fadhiisteen, kana durugsanaayeen Idil iyo Geedi. Waxay arkeen Idil oo kursigii ay fadhiday dhowr jeer ka kacday oo bedeshay, mar kasta oo Geedi ka daba yimaadana sidaa samaynaysa. Inantaasi waxay Idil walaalkeed u sheegtay in ay habeenimadii hore aragtay iyaga oo murmaya, kadib markii iuu Geedi u diiday in ay cabto cabitaan enerji ah oo uu cabayay, isagoo leh uma fiicna ilmaha caloosha ku jira. Filimka kadib waxay inantu Idil weydiisay sababta ay u cadhoonayso, Idilna waxay ugu jawaabtay in Geedi uu cunaha qabtay oo uu damqay. Inantu waxay mar dambe Geedi weydiisay wixii dhacay, wuxuuna ku yidhi waxaan doonayay in ay i soo eegto. Idil waxay ku jawaabtay: "Qoorta ayuu si fiican ii qabtay". Aad ayay Geedi ugu xanaaqsanayd, wayna oyday waayo waxay moodaysay in inaabtideed/inaadeerteed/habarwadaagteed aanay iyada rumaysan.

2.10.13. Markii ay guriga ku soo socdeen, Idil walaalkeed wuxuu iyada weydiiyay dhacdadii ku saabsanayd cabitaanka enerjiga, waxayna u sharaxday in cadhadeedu aanay ku koobnayn dhacdadan oo keliya, in dhinac kale ama dabeecad kale oo uu Geedi leeyahay ay aragtay, in uu gacanta barariyay marka ay guriga joogeen, iyo in sidoo kale uu isku dayay in uu qoorta xoog u qabto. Labadooduba waxay sheegeen in habeenkaa markii dambe ay heshiiyeen, laakiin Idil waxay weli u eegayd in ay cadhaysantahay.

2.10.14. Bishaa dhamaadkeedii Idil waxay seexatay guriga (flat) eedadeed/habaryarteed si ay inaadeerteed/inaabtideed/habrwadaagteed uga caawiso in ay ilaaliso eedadeed/habaryarteed caruurteeda yaryar. Markay saacaddu ahayd 3.08am ayuu Geedi guriga (flat) yimid, wuxuuna yidhi

waan isdilayaa. Wuxuu yidhi waan ka xumahay, wuxuuna weydiistay fursad labaad laakiin waxay u sheegtay in ay reerkooda u sheegayso in ay doonaysay in ay iska furto.

2.10.15. Maalintii ku xigtay markay saacaddu ahayd 5.50pm Idil waxay mar kale joogtay guriga (flat) eedadeed/habaryarteed, markii uu walaalkeed maqlay iyadoo ka jawaabaysa telefoon uu Geedi u soo diray. Wuxuu maqlay Geedi oo leh xubno qoyskiisa ka mid ah ayaa imanaya iyo in uu doonayo in Idil ay gurigooda (flat) ku soo noqoto oo ay hagaajiso. Waxay u sheegtay in aanay samayn karaynin waayo waa markeedii oo waxay ilaalinaysaa caruurtii eedadeed/habaryarteed. Waxay weydiisay in uu booqashada dib u qorsheeyo oo uu maalin kale ka dhigo. Wuxuu ku jawaabay “Maya go’aankayga waan gaadhay” sidaa daraadeed waxay u sheegtay in ay guriga imanayso. Xijaab dheer ayay xidhatay, waxayna ka baxday gurigii eedadeed/habaryarteed. Walaakeed ayaana joogay oo inaadeertii/inaabtiddii/habarwadaagtii ka caawiyay in ay caruurta hayso. Qof qoyskeeda ka mid ahi dib umuu arag iyadoo nool.

Qaybta Saddexaad: Ujeeddada, baaxadda iyo xuduudaha hawsha (Terms of Reference).

3.1. Ujeeddada Dib-u-eegista Dilka Qoyska ka Dhexdhacay waa:

- In la hubiyo in dib-u-eegista loo sameeyay sida ugu wanaagsan ee dhaqangalka ah, iyadoo la samaynayo falanqayn wax-ku-ool ah iyo macluumaadka kiiska la xidhiidha iyo waxa ka soo baxa oo si fiican loo soo gunaanado.
- In la soo saaro casharada kiiska laga bartay iyo sida ay shaqaalaha xirfadda u leh arrimahan iyo hay’duhu ay gaar ahaan iyo guud ahaan (ama koox ahaan) u wada shaqayn karaan iyo sida ay u ilaalin lahaayeen bedqabka iyo iyo taageerada dhibanayaasha uu gacan-ka-hadal qoyska dhexdiisa kaga dhaco (victims of domestic violence) kana mid yihiin caruur mas’uul laga yahay.
- In si cad loo qeexo waxa ay casharadaasi yihiin, hay’adaha dhexdooda iyo wadashaqayntooda labadaba, sidee iyo wakhti intee leeg ayay ficil la iman doonaan iyo waxa laga filayo in ay natiijo ahaan bedelaan.
- Casharadan oo lagu isticmaalo fal-celinta adeegyada kana midyihiin wax ka bedelidda siyaasadaha iyo hab-dhaqmeedka shaqada (policies and processes) sida ugu haboon; iyo
- Ka hortagidda gacan-ka-hadalka dilka qoyska ka dhexdhaca (domestic violence homicide) iyo horumarinta fal-celinta adeegyada ku saabsan dhamaan dhibanayaasha gacan-ka-hadal kaga dhaco qoyska dhexdiisa iyo caruurtooda laguna horumarinayo hay’daha gudahooda iyo wadashaqaynta dhexdooda.

3.2. Guud-mar iyo La-xisaabtan (Overview and Accountability)

3.2.1. Go’aanka in Bristol ay samayso Dib-u-eeegista Dilka Qoyska ka Dhexdhaca (Domestic Homicide Review (DHR)) waxa qaatay Guddoomiyaha Bristol Community Safety Partnership 25kii August 2015, Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Home Office) waxa la wargeliyaa 3^{dii} September 2015.

3.2.2. Tasmada sharciga ah ee Wasaaradda Arrimaha Guduhu (Home Office Statutory Guidance) waxay leedahay marka ay suurtoagal tahay in ay dhaqangasho DHR waa in la dhameeyaa lix bilood gudahood marka go'aanka la gaadhay si Dib-u-eegista loo wado. Dib-u-dhac ku yimid dacwadda oo ku saabsanayd baadhitaanada caafimaadka maskaxda ee Geedi, suurtoagal may ahayn in Dib-u-eegis lagu sameeyo wakhtigaa la cayimay. Wasaaradda Arrimaha gudaha waxa dib-u-dhaca DHR loo sheegay 7dii December 2015 ilaa iyo ay dacwadda maxkamaddu ka dhamaanayso.

3.2.3. Dib-u-eegista Dilka Qoyska ka Dhexdhaca waxa loo guntaday, iyadoo la raacayo Xeerka Sinaanta 2010 (Equalities Act 2010), weliba damiir ku dhisan cadaalad, sinaan, daacadnimo iyo qarsoodi la'aan, in loo Sameeyo si sax ah oo aan saxar laga tegin.

3.3. Dib-u-eegista Dilka Qoyska ka Dhexdhaca waxay eegi doontaa:

3.3.1. Hay'ad kasta qaybtii ay ku lahayd kuwan soo socda, laga bilaabo 1dii March 2010 ilaa iyo dhimashadii Idil ee July 2015, iyo sidoo kale xidhiidhkii ay la lahaayeen wakhtigaa ka hor taasoo la xidhiidhi karta waxyeelayn (aflagaado ama faroxumayn) qoyska dhexdiisa ah (domestic abuse), gacan-ka-hadal (violence) iyo arrimo la xidhiidha caafimaad darro dhinaca maskaxda ah.

- a. Idil Ahmed (maaha magaceeda dhabta ah) 22 jir ayay ahayd markii ay dhimaatay
- b. Geedi Aadan (maaha magaciisa dhabta ah) 21 jir ayuu ahaa markii dhacdadani dhacday
- c. Bilan (maaha magaceeda dhabta ah) waa dhibanaha iyo dembiilaha inantooda, 4 sannadood ayay jirtay markii arrintu dhacday.

3.3.2. In ay jireen dabeecado waxyeelooyin leh oo taariikhiya oo lagu hayay marxuumadda ama ilmaheeda iyo in hay'aduhu ay ogaayeen.

3.3.3. In qoyska iyo asxaabtu ay doonayaan in Dib-u-eegista ay ka qaybqaataan. Haddii ay sidaa tahay, waa in la hubaal-ogaado in ay ka warhayaan dabeecado waxyeelo leh oo lagu hayay marxuumadda ama ilmaheeda, ka hor intii aanu dilku dhicin.

3.3.4. Dhinaca qoyska, in ay jireen caqabado lagala kulmay in waxyeelooyinka laga dacwodo?

3.3.5. Haddii mid ka mid ah kuwa soo socda la horumarin lahaa, ma laga yaabaa in Idil ay heli lahayd natiijo ka duwan iyadoo la eegayo:

- a) Xidhiidhka iyo macluumaad isweydaarsiga ka dhexeeyay hay'adaha
- b) Macluumaad isweydaarsiga ka dhexeeya adeegyada marka la eegayo bedqabka (safeguarding) dadka qaangaadhka ah iyo caruurta
- c) Sida ay adeegyadu dhexdooda u wada xidhiidhaan
- d) Xidhiidhinta iyo sida shicibka loo gaadhsiiyo iyo adeegyada guud (aan wax gaar ah ku takhasusin) ee ku saabsan nooca iyo sida uu u baahsanyahay waxyeelada qoyska ka dhexdhacda, iyo adeegyada arrimahan ee deeganka/nawaaxiga laga helo

3.3.6. In hawsha ay adeegyadu ay arrintan ka qabteen ay tahay mid la jaanqaadaysa hawsha ay hay'ad walinba qabato:

- a) Heerarka xirfadaha shaqada
- b) Habdhaqmeedka iyo siyaasadda shaqada iyo borotokoolka

3.3.7. Fal-celinta ay hay'adaha ay khusayso ka sameeyeen arrimaha loo soo gudbiyay ee Idil la xidhiidha kuna saabsan waxyeelo qoyska ka dhexdhacday ama waxyaabo kale oo dhaawac halis leh intii u dhexaysay 1dii March 2010 iyo dhimashadeedii July 2015. Waxay baadigoobi doontaa in ay fahamto go'aamadii iyo tallaabooyinkii la qaaday waxay ahaayeen, ama aan la qaadin, iyo in la ogaado sababaha ka danbeeyay. Gaarr ahaan, arrimahan soo socda ayaa si qotodheer loo baadhi doonaa:

- a) In la calaamadeeyo fursadaha ugu muhiimsan ee baadhitaanka, go'aan qaadashada iyo ka hortagis kiiskan la xidhiidha laga bilaabo markii koowaad ee xidhiidh lala yeeshay dhibanaha, dembiilaha ama ilmaheeda.
- b) In tallaabooyinkii la qaaday ay ahaayeen kuwo la jaanqaaday baadhitaanada iyo go'aamada la gaadhay iyo in wax-ka-qabashadii la sameeyay ay mid wax-ku-ool ah oo wakhtigii loo baahnaa la qaday.
- c) In adeegyo kku haboon loo fidiyay ama la siiyay ama ay ku haboonaayeen baadhitaanadii la sameeyay.
- d) Tayada baadhitaanada ka hortagida khataraha ee hay'ad kastaa ay samaysay marka Idil loo eego, inanteeda ama dembiilaha.

3.3.8. In baaxadda heerarka ka hortaga dhibaatooyinka ama wax-ka-qabashada ee hay'adaha sidii ku haboonayd loo dhisay iyo/ama si sax ah loo dhaqangaliyay, marka kiiskan loo eego.

3.3.9. In hab-dhaqmeedka hay'aduhu uu ahaa mid tixgelinayay jinsiyadda, dhaqanka, luqadda iyo diinta shakhsiyaadka wax loo qabanayay iyo in la baadhay baahi gaara oo arrinta la xidhiidha, si ku haboon isu gaadhsiiyay oo la qoray (ama xogtaa la ururiyay).

3.3.10. In maareeyayaasha sare arrimaha loo gudbiyay ama hay'ad kale iyo shaqaale xirfadooda ay khusayso, haddii ay haboonayd, iyo in wakhti munaasab ah lagu dhameeyay.

3.3.11. In la ogaaday in loo baahnaa tabobar iyo wacyigelin si loo hubiyo aqoon dheeraad ah iyo faham la xidhiidha habka iyo/ama adeegyada waxyeelooyinka qoysaska ka dhexdhaca.

3.3.12. In la ogaaday in loo baahnaa tabobar iyo wacyigelin si loo hubiyo aqoon dheeraad ah iyo faham la xidhiidha dhaqanka ayna ka midyihiin gudniinka (female genital mutilation) iyo gacan-ka-hadalka la xidhiidha sharafta reerka weliba marka loo eego dilka qoysaska ka dhexdhaca.

3.3.13. In go'aamadii la gaadhay marka uu dembiiluhu uu UK soo galay ama yimid ay ahaayeen kuwo ku haboon hababka iyo borotokoolka ciidank xuddudaha (Border Force).

3.3.14. Dib-u-eegistu waxay eegi doontaa macluumaadka kale ee la ogaado in ay xaaladda ku haboonyihiin.

Qaybta Afaraad: Arrimaha ugu Muhiimsan (Key Issues).

4.1. Guddiga Dib-u-eegistu waxay heleen fursad ay ku fallanqeeyaan dhamaan macluumaadkii ay heleen, waxayna qaateen in arrimaha ugu muhiimsan ee Dib-u-geestani ay yihiin:

4.2. Saamaynta uu guurkooda ku yeeshay markii arooskooda kadib ay kala baqooleen ayna shan sannadood ku kala noolaayeen waddamo kala duwan oo dhaqamadoodu ay iska soo horjeedaan.

4.2.1. Geedi iyo Idil waxay ahaayeen dad da'doodu yartahay markii ay isguursadeen December 2009. Idil waxay ahayd shan-iyo-toban jir, Geedina wuxuu ahaa, sida ku qoran da'dii uu sgeegay markii uu UK yimid iyo Talyaaniga, wuxuu sidoo kale ahaa shan-iyo-toban. (Arrintaa waxa ka soo horjeestay Idil qoyskooda oo yidhi intaa wuu ka weynaa.)

4.2.2. Idil iyo Geedi waxay is qabeen saddex bilood markii ay bishii March 2010 Idil ka timid Geedi si ay qoyskooda intoodii kale ugu timaado oo UK, sidaa daraadeed may helin fursad ay si fiican isugu bartaan intii aanay soo kala boqoolin ka hor.

4.2.2. Markii ay Idil ogaatay in ay uur leedahay bishii May 2010, macluumaad badan kamay bixn saygeeda, umana sheegin hay'adaha adeegyada caafimaadka ee ay la xidhiidhay, wax aan ahayn inuu Itoobiya ku noolyahay. Telefoonka ayuun bay kala xidhiidhi jirtay. Bishii November 2012 faylka Idi lee GPgeeda waxa lagu qoray in qoyskeedu uu England joogo laakiin saygeedu weli wuxuu joogaa Itoobiya, baasaaboorna ma haysto, "Tani werwer ayay iyada kiu keentay lakiin waxay ahayd qof aan sidaa murugaysnayn".

4.2.3. Geediwuxuu u baxay safar khatar ah oo uu ku maray Afrika isagoo Liibiya soo maray, kadibna dooni yar Talyaaniga ku soo galay ujeeddadiisuna ay hayd in uu Idil England ugu yimaaddo. 2014tii Idil waxay u safartay Talyaaniga si ay isaga u soo aragto, waxayna la soo joogtay muddo bil ah kadibna waxay ku soo noqotay UK iyadoo Geedi kaga timid Talyaaniga. Mar dambe waxay u sheegtay gabadh ay ilmaadeer/inaabti/habarwadaag yihiin in ay Geedi ku tidhi in ay doonayso in ay iska furto markii ay Talyaaniga la joogtay. Gabadhaasi waxay sheegtay in ay Idil aad ula yaabtay markii iuu Geedi UK yimid isagoo aan iyada u soo sheegin.

Xubin ka mid ah Guudiga Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa hoosta ka xariiqday in Idil ay u samayn kartay waddo uu Geedi si sharci ah UK ugu soo galay, laakiin waxay u muuqataa in aanay samaynin.

4.2.4. Xubnaha qoyska ayaa sharaxay in Idil ayy ahayd qof kal adag iyo in ay samayso waxay doonayso, inkastoo aanay iyaga ula muuqan in Geedi isku dayay in uu muquuniyo oo aanay ka daba

hadlin. Midkoodna diinta kumuu adkayn, intii ay UK joogtay Idil waxy xidhan jirtay dhar isugu jira kuwa dhaqanka iyo kuwa reer galbeedka, badanaa waxay xidhan jirtay jeans markay baxayaan.

4.2.5. Guud ahaan qoysku waxay qabeen fikrad ah in Idil iyo Geedi ay si fiican u wada joogeen. Si kastaba ha ahaatee, Idil inaabtideed/inaadeerteed/ habaryarteed oo ay aad isugu dhawaayeen, ayaa ciidanka amaanka (police) u sheegtay in markii hore ay Idil ay aad u faraxday markii Geedi uu England yimid. Waxay tidhi, Idil weligeed wax taban Geedi kamay sheegin, calaamadihii ugu horeeyay ee ay qoysku dareemeen in ay labadooda xurgufi dhextaalo waxay ahayd saddexdii cisho ee ka horeeyay dhimashadii Idil. (Dhacdooyinka waxa lagu faahfaahiyay 2.10.11. - 2.10.14 ee warbixintan).

4.2.6. Geedi wuxuu dareemay in aanu waxba haysan, shaqo muu heli karaynin waayo waraaqihiisa sharciga ayaan u ogolayn, wuxuuna sheegay in aanu qaadan jirin lacagaha taageerada ah ee la siiyo dadka danyarta ah (benefits). Wuxuu dareemay in aanay Idil isaga ixtiraamin, gurigu (flat) magaceeda ayuu ku qornaa, waxaana lacag ka soo geli jirtay lacagta kabista ah ee la siiyo (benefits). Markii ay ciidanka amaanku (police) Geedi waraysteen dhimashadii Idil kadib, wuxuu yidhi, “Waxa ugu xun ee qof bini’aadam ah ku dhici karaa waa in loola dhaqma sidii aanu waxba ahayn oo uu qof mar kasta kuu sheegayo, in ay iyada tahay qofka waxan iska leh, ay awooddo, oo ay tan haysato adiguna waxba ma tihid. Qof jira ma tihid; waa wax aad u xun oo la dareemo.”

4.2.7. Waraysi uu dhakhtarka maskaxdu la yeeshay markii la xidhay kadib Geedi wuxuu sheegay in toddobaadyadii ka dambeeyay markii uu yimid in wax walba ay labadooda caadi ahaayeen, laakiin markaa kadib Idil may soo dhawaynin, waxayna u muuqatay in aanay imaanshihiisa jeclaysanin. Si joogto ah ayay isga fogaysay, inkastoo ay uur isaga u yeelatay, wixii markaa ka dambeeyay way diiday in uu u galmoodo. Wuxuu yidhi wuxuu noqday qof “maskaxdiisu aanay xasiloonaayn” iyo in ay xaaladani sii xumaatay. Wuxuu yidhi, wuxuu isku dayay in uu dulqaato laakiin aayar aayar ayuu dulqaadkii uga lumay, noloshuna way ku sii adkaatay. Wuxuu sheegay in uu isbedel ku yimid ayna ka dhalatay dhibaata maskaxda ka haysatay. Idil waxay u sheegtay oo ay ugu celcelisay in uu gurigooda ka tago, wuxuuna ku andacooday in ay gacan u qaaday oo ay marar kala duwan wax ku dhufatay. Guriga kamuu tegin waayo muu haysanin meel kale oo uu tago iyo qoys iyo asxaab gacan qabata.

4.3. Geedi Aadan caafimaadkiisa maskaxda

4.3.1. May jirin sabab ay Idil qoyskeeda iyo asxaabteedu ku rumaystaan in uu maskaxda ka xanuunsanayo. Markii ugu horeeyay ee qof qoyska ka mid ahi uu dareemo in caafimaad darro maskaxda ahi jirto waxay ahayd saacadihii ugu horeeyay ee maalintaa dilku dhacay, kadib markii ay Idil ku tidhi waxaan doonayaa in aan berri qoyskayga u sheego in aan doonayo in aan iska kaa furo, iyadoo hor joogto inaabtideed/inaadeerteed/habaryarteed, wuxuu ku hanjabay in uu nafta iska qaadi doono oo uu cabi doono waxa musqusha lagu nadiifiyo.

4.3.2. Maalintii uu UK yimid, wuxuu saraakiisha socdaalka (Immigration Enforcement officers) u sheegay in uu is dili doono, laakiin isla maalintaa markii dambe wuxuu yidhi waan iska idhi, inkastoo

aanay run ahayn. Wuxuu mar kale yidhi waan is dili doonaa markii la geeyay Saldhiga Ciidanka Amaanka kadib markii loo xidhay dilkii Idil.

4.3.3. Kadib markii lagu soo oogay dembiga in uu Idil dilay,, Geedi waxa baadhay laba dhakhtar oo caafimaadka maskaxda qaabilsan.

4.3.3.1. Ka koowaad, isagoo u hadlaya kooxdii difaacaysay, wuxuu tilmaamay in dilkii Idil ka hor aanu jirin dhibaatooyin caafimaadka maskaxda la xidhiidha, laakiin wuxuu ku daray “Waa wax lala yaabo haddii aanay jirin dhibaato kaga timid jidh dil iyo dhibaatooyinkii adkaa ee murugada lahaa ee ka soo maray safarkiisii uuu wadankiisii kaga yimid ee uu meel kale ku yimid Iyadoo la qaadanayo xaaladda uu imika ku jiro maan joogin meel aan si qotodheer ugu baadho saamaynta ay caafimaadkiisa maskaxda ku yeeshen arrimahaa la sheegay in uu soo maray. Dhamaan cadaymuhu waxay sheegayaan in uu ka mas’uul ahaa ficilkii gacan-qaadka ahaa ee dhimashada keenay. Isla markii ay taasi dhacday waxa la hayaa cadayn sheegaysa in uu ogaa wixii uu sameeyay.”

4.3.3.2. Dhakhtarka labaad ee caafimaadka maskaxda, oo isaguna Geeedi baadhitaan ku sameeyay, ayaa yidhi “Heerka ay taagantahay dhibaataada maskaxda ka haysata markii la baadhay waxay sheegaysaa in aanu imika awoodin in uu dembiga iska difaaco ama qirto Ma cadda markii ay bilaabmeen calaamadaha caafimaad darrada ah ee imika haysta. Warbiximaha markhaatiyada laga qoray waxay sheegayaan cadymo aan badnayn in ay dilka ka hor jireen. Sida daraadeed natiijooyinkii hordhaca ahaa ee ka soo baxay baadhitaanadaydii waxay sheegayaan in aanay jirin cadayn faro badan oo lagu taageero difaacid ah in aanu mas’uuliyad qaadi karayn wakhtigan xaadirka ah.”

4.3.4. Xaakinkii dacwaddu markii uu Geedi Aadan xukumayay wuxuu yidhi:

“Waddankan imaanshihiisa waxaad u soo martay safar adag oo aad ku dhibtootay laakiin taasi marmarsiiyo kuuma siinayso wixii aad samaysay.

Xaaladda maskaxdaadu siday doonto ha ahaatee, waxaan ku qanacsanahay anigoo maqlay cadaymihii aad bixisay in aad si arxan darro ah u qorshaysay dilkii xaaskaaga. Waxaad ka soo sasabatay gurigii (flat) eedadeed/habaryarteed oo ay timid gurigii aad wada deganaydeen oo ku yaalay dabaqa toddobaad, adigoo sheegay sheeko odhanaysa in xubno qoyska ka mid ahi ay booqasho ku imanayaan. Waxaan shaki igaga jirin in ay taasi ahayd been aad ugu talogashay in aad guriga keligeed ku hesho si aad u disho.

Waa in fiiro gaar ah loo yeeshaa in aanad lahayn geesinimo aad ku qirato in aad dembiga gashay. Bedelkeedii waxaad la shir timid mala-awaal aad faahfaahisay si aad u soo jeediso in xaaladda caafimaad ee maskaxdaadu aanay kuu ogolaanayn in aad maxkamad soo istaagto ama aad sharaxdo dilkii xaaskaaga. Isku daygaasi muu shaqaynin, taasi maaha wax dhibaato keenaya laakiin waxay kaa nusqaamisay abaalmarintii aad lahayd haddii aad qirato inaad iyada dishay.”

4.3.5. Sidaa daraadeed Guddiga Dib-u-eegistu waxay qaateen fkirka ah in hanjabaadii Geedi ee ahayd in uu is-dilayo ay ahayd dabeecad uu isticmaalo marka ay xaalad adagi soo wajahdo.

4.4. Xidhiidh yaraanta hay'adaha (Minimal contact with agencies).

4.4.1. Inkastoo Idil ay adeeg bixiyeyaasha caafimaadka wax badan la xidhiidhay, waxa kale oo ay aad ula xidhiidhay waxay ahayd adeegyada wax ka qabta baahida guryaha iyo lacagta kabisata ee danyarta la siiyo(benefits). Xidhiidhadan badankoodu waxay dhaceen ka hor intii aanu saygeedu si lama filaan ah u imanin UK bishii March 2015, manay jirin wax tilmaamaya waxyeelo qoyska ka dhex dhacdaay oo ay hay'adahaasi ka werweraan.

4.4.2. La taliye gaar ah oo arrimaha Soomaalida qaabilsan ayaa sharaxay in dhaqan ahaan dumarka Soomaalidu aanay jeclayn in ay akhbaar ama macluumaad iyaga gaar u ah ay bixiyaan oo u sheegaan qof ka baxsan qoyskeeda ama qabiilkeeda, sidaa daraadeed maaha wax lala yaabo in hay'aduhu ay wax yar nolosheeda ka ogaayeen. Hooyadeed iyo walaalkeed (oo ay kala aabo yihiin) ayaa Dib-u-eegista u sheegay in intii aanu Geedi iman, idil ay siin jirtay wakhti ay ku caawiso carruurtooda yayryar iyo in ay wakhti aan badnayn ay hooyadeed ka wada shaqeeyeen, kuna shaqaysa nadiifiso (cleaner) ahaan. Iyaga iyo inaabtideed/inaadeerteed/habaryarteed waxay iyada ku tilmaameen in ay ahayd qof go'aan adag oo waxay doonayso qabata.

4.4.3. Geedi wuxuu DHR u sheegay, isagoo u soo marinaya maareeyihiisa dembiilaha (Offender Manager), in aanu hay'daha wax xidhiidh ah la samayn iyo in aanu GP iska diiwaan gelin maadaama uu sharci darro waddanka ku soo galay, waayo muu doonaynin in uu sameeyo wax ka baabi'in kara fursadda loogu ogolaan karo in uu UK joogo.

Qaybta Shanaad: Casharadii Laga bartay (Effective Practice/Lessons Learnt).

5.1. Hay'adaha Bristol

5.1.1. Guddiga Dib-u-eegistu waxay aqoonsadeen in dumarka Bristol imanaya iyagoo qaxooxita ah laga yaabo in aanay helin fursad, luqad iyo kalsooni ama ay fahmaan sharciga Britishka oo ay waxyeelooyinka qoyska ka dhexdhaca (domestic abuse) kala hadlaan qof ka socda hay'ad ama bulsho weynta. Sidaad daraadeed guddigu waxay hoosta ka xariiqayaan shaqada wanaagsan ee ay qabtaan urrurka "Refugee Women of Bristol" oo ay taageeraan Bristol City Council Public Health, deeq lacageedna ka hela Commissioner's Community Fund si ay u wargeliyaan dumarka ka tirsan bulshooyinka soo haajiray ee Bristol ku nool, weliba afkooda hooyo kula hadlaan, kuna saabsan adeegyada taageerada bixiya ee caawinaya lana xidhiidha waxyeelada qoysaska ka dhexdhacda (domestic abuse) iyo iyo gudniinka fircooniga ah (FGM).

5.1.2. Guddigu waxay aqoonsanyihiin shaqada aan badnayn ee Bristol laga qabtay si wax looga qabto ama bedelo arrimaha sida qaldan loo fahamsanyahay ee quudhsiga dumarka, gaar ahaan arrimaha la xidhiidha dumarka qoysaska dhexdooda lagu waxyeeleeyo.

5.1.3. Guddida iyo hay'adaha ka qaybqaadanay Dib-u-eegistan waxay u guntadeen in ay si cadaalad, sinaan, daacadnimo, iyo qarsoodi la'aan wax u qabtaan iyagoo racaya Xeerka Sinaanta 2010 (Equalities Act 2010). Si kastaba ha ahaatee DHR waxa lagu ogaaday in Geedi iyo xubin kale oo qoyska

ka mida ay rumaysnaayeen in dumarku ay raggooda mar walba adeecaan oo ka dambeeyaan wax su'aal ahan aanay ku soo celin. Inkastoo Bristol laga qabtay hawl lagu dhiirigelinayo in dhaqamadaa la bedelo haddana waxa loo baahanyhaay in hawl badan lala qabto bulshooyinka soo haajiray.

5.2. Guriyeynta Dawladda Hoose ee Bristol (Bristol City Council Housing)

5.2.1. Idil waxa la ogaa in ay ahayd hooyo da'yar oo qaxooti ah, oo aan wax badan ka fahamsanayn mas'uuliyadda saaran qofka guri kiraysta ama laga kireeyo; inkastoo ay markii hore diiday taageeradii loo fidiyay, bedelkeediina doonaysay in ay hooyadeed ku tiirsanaato, isla markiiba waxa cadaatay in aanay maareyn karin. Waxay ahayd in si joogto ah loola xidhiidho oo loo gudbiyo taageero wax ka qabata amaahda lagu leeyahay ee sii kordhaysa.

5.2.2. Sarkaalka u qaabilsan Taageerada Waalidiinta Da'da Yar (Teenage Parent Support Officer) wuxuu hoosta ka xariiqay in aanay haysanin alaabtii ay guriga dhigan lahayd (sida sariiraha, kabadhaha, kuraasta, iwm) ee awood u siin lahaa in ay guriga ku degto. Waxay ahayd in arrintan la ogaado markii heshiiska kirada guriga la kala saxeexanayay, loona gudbiyo kooxda kirada guryaha goglan.

5.2.3. Kadib markii taageero dheeraad ah markii Idil la siiyay, lana ogaaday in ay tahay qof wax badan u nugul amam daciif ah, Adeegyada Guryaha Bristol may daba gelin oo lagama warhaynin in ay weli jilicsantahay ama daciif tahay. Wax xidhiidh ah lalama samayn muddo sagaal bilood ah markaasoo kadib loo sheegay dhimashadeedii.

5.3. Kooxda Qoondeynta Arrimaha Caafimaadka Bristol (Bristol Clinical Commissioning Group)

5.3.1. Dhakhtarka Qoyska ee Xaafadda (GP Practice) waxay sameeyeen hawlgal muhiim ah ay ku urruriyeen macluumaad la xidhiidha wadatashigii 24kii May 2010, waxayna ku soo gunaanadeen macluumaadkii la soo bandhigay waxay dhalin kareen in ay dhacdo gudbin la xidhiidha hawlaha bedqabka (safeguarding referral) madaama ay Idil wakhtigaa jirtay 16 sannadood oo keliya.

5.4. University Hospitals Bristol NHS Foundation Trust

5.4.1. Arrimihii Idil ku saabsanaa ee lagu soo bandhigay waaxda/dhakhtarka TBga (TB Clinic), waxa dhici kartay in si adag loo qaato ama eego si loo hubiyo in taageero ku haboon ay jirto.

Qaybata Lixaad: Gebogebo.

6.1. Markii ay soo gebogebaynayeen Guddiga Dib-u-eegistu waxay diiradda saareen su'aalahan:

6.2. *Hay'daha Dib-u-eegista ka qaybqaatay miyay fursaddan uga faa'iideysteen in ay dib-u-eegaan xidhiidhkii ay Idil la sameeyeen, Geedi ama Bilan, waxna ma ka qabteen casharadii laga bartay?*

6.2.1. Guddiga Dib-u-eegistu waxay aqoonsanyihiin inkastoo Dib-u-eegisyada Maareynta Shakhsiga (Individual Management Reviews) si isku mid ah u eegeen, si furan oo su'aalaya aragtida Idil, Geedi iyo Bilan, waxa jiray casharo waxoogaa ah oo Hay'aduhu ay ka baran karaan xidhiidhkii yaraa ee ay qoyska la yeesheen. Taladii Khaaska ahayd ee Arrimaha Soomaalida (Specialist Advise on Somali Issues) waxay Guddiga u sheegtay in qoysaska Soomaalidu aanay sida caadiga ah arrimaha u gaarka ah kala hadlin cid qoyska ama reerka (qabiilka) ka baxsan. Waxa mudan in fiiro gaar ah loo yeesho in Idil aanay qarín faro xumeyntii lagu sameeyay markii ay Itoobiya joogtay, hooyadeed iyo iyaduba waxay sheegeen in aanay wax xidhiidh ah la lahayn qofkii arrintaa ka mas'uulka ahaa iyo in aanay doonaynin in ay wax dacwad ah ka furaan waxyeeladaa. Idil weligeed wax dacwad ah kamay samaynin saygeeda. Intii uu Talyaaniga joogay telefoonka ayay kala xidhiidhi jirtay, hal marna halkaa ayay ku booqatay. Idil hay'adaha midkoodna Geedi umay sheegin ama kala may hadlin intii uuu UK joogay. Maadaama uu sharci darro waddanka ku joogay Geedi dhakhtarka qoyska ee xaafadda (GP) iska muu diiwaangelin, hay'adna xidhiidh lamuu yeelan marka laga reebo Saldhig Ciidanka Amaanku leeyihiin (Police Station) oo uu bishiiba laba jeer iska soo xaadirin jiray.

6.2.2. Guddiga Dib-ueegistu waxay aqoonsadeen in dadka cusub ee qaxootiga ahi ay soo mareen dhibaatooyin badan, wax badana ku soo dheceen, iyo iyagoo aan wax aqoon ah u lahayn hababka UK la isu caawiyo ama caawimo loo helo iyo sharcigaba. Tani waxay iyaga ka dhigi kartaa kuwo aad khatar ugu ah in ay noqdaan dhibaneyaal iyo/ama dembiileyaal ka qaybqaata waxyeelooyinka qoyska ka dhexdhaca (iyo arrimaha kale ee caafimaadka ama xaalad-nololeedka guud). Waxa loo baahanyahay in la qaado tallaabo laga qaybgelinaya hawlaha si loo hubiyo in ay helaan caawimo iyo taageero ku haboon si khatarta loo yareeyo.

6.3. Tallaabooyinka ay hay'adahani qaadaan mustaqbalka ma horumarin doonaan bedqabka Bristol ee dhibaneyaasha waxyeelooyinka qoysaska ka dhexdhaca gaar ahaan bulshooyinka magaalada ku cusub?

6.3.1. Guddigu waxay ku qanacsanyihiin dhaqangelinta iyo soo jeedinta ay Dib-u-eegistu samaysay iyo sii wadidda shaqada bilaabantay, ay wax ka qaban doonto baahida hoosta laga xariiqay ee casharada laga bartay iyo in ay wax ku kordhin doonto nolosha dhibanyaasha waxyeelooyinku Bristol ku soo gaadhaan, gaar ahaan kuwa ka soo jeeda bulshooyinka muhaajiriinta iyo qaxootiga ah.

6.3.2. Waxa jira laba meelood oo ay Guddigu hoosta ka xariiqeen oo ay u aqoonsadeen hab-shaqeed wanaagsan:

- Dhakhtarka Qoyska ee Xaafadda (GP Practice) ee ay Idil tegi jirtay, wuxuu leeyahay shaqo siyaasadeed (policy) ku saabsan waxyeelaynta (abuse). Waa habka IRIS (Identification and Referral to Improve Safety) oo qof loo tabobaray oo kulano toddobaadle ah u qabta mareeyayaasha (management), oo kala hadla bukaanka (patients) khatar u ah in qoyska dhexdiisa lagu waxyeeleeyo. Dhakhtarkaasi oo khibrad iyo xirfad u leh, si fiicana u fahamsan qiimaha dhaqamada bulshooyinka kala duwan ee ay u adeegaan waxay shaqaaleysiyaan oo saacadaha shaqada ka dhex shaqeeya af-

celiyeyaal (ama tarjubaano) shahaadooyinkooda la aqoonsanyahay si loo hubiyo in bukaanku (patients), gaar ahaan dumarka loo malaynayo in aanay helin fursad ay luqadooda ku kobciyaan, ay awoodaan in ay si kalsooni leh oo qarsoodi ah uga hadlaan ama u sharaxaan dhibaatooyinkooda iyadoo aanay xubno qoyskooda ka mid ahi agagaarka ka dhawayn.

- Hawsha ay qabtaan “Refugee Women of Bristol” oo ay taageeraan Bristol City Council Public Health, deeq lacageedna ka hela Commissioner’s Community Fund si ay u wargeliyaan dumarka ka tirsan bulshooyinka soo haajiray ee Bristol ku nool, weliba afkooda hooyo kula hadlaan, kuna saabsan adeegyada taageerada bixiya ee caawinaya lana xidhiidha waxyeelada qoysaska ka dhexdhacda (domestic abuse) iyo iyo gudniinka fircooniga ah (FGM).

6.4. *Dhimashadii Idil Ahmed ma waxay ahayd mid la saadaalin karayay ama laga hortagi karayay?*

6.4.1. Ilaa iyo intii uu Geedi UK joogay ilaa iyo maalintii dhimashada Idil, hay’daha keliya ee la ogyahay in uu la xidhiidhay, marka laga reebo Saldhig Ciidanka Amaanku leeyahay oo uu iska soo xaadirin jiray, waa Wasaaradda Arrimaha Gudaha (Home Office) iyo qareenkiisa (solicitor). May jirin sabab uu midkoodna kaga shakiyo in uu gacan-ka-hadal (violent) samayn karo ama aanu raalli ka ahayn la joogitaanka xaaskiisa.

6.4.2. Sidoo kale ilaa intii uu saygeedu UK yimid Idil xidhiidh badan hay’adaha lamay lahayn, hay’adina kamay warqabin in aanay farxad ku noolayn iyo in uu Geedi waxyeelo u gaysto. Wakhti yar ka hor dhimashadeedii waxay walaalkeed (oo ay dhinaca hooyo ka walaalo yihiin) iyo inaabtideed/inaadeerted/habarwadaagteed u sheegtay in Geedi uu gacanta u qaado laakiin waxay aaminsanayd in labadooduba ay ka cago-jiideen in ay rumaystaan. Idil walaalkeed wuxuu DHR (Dib-u-eegista Dilka Qoyska Dhexdiisa) u sheegay in aanu marna ku fekerin in Geedi uu Idil gacanta u qaado waayo wuxuu mar walba u muuqday qof aamusan oo ixtiraam badan. Wuxuu intaa raaciyay haddii uu ogaan lahaa in Geedi yahay qof gacan qaada (violent) in qoysku ay arrinta dhamayn lahaayeen, waayo haddii hay’ado dibedda ah arrinta la gaadhsiiyo reerka ayay sumcad xumo u keeni lahayd.

6.4.2. Guddiga Dib-u-eegistu waxay ku qanceen in aanay hay’aduhu waxba ka ogayn dhibaataada ka dhextaagnayd Idil iyo Geedi guurkooda, sidaa daraadeed may jirin sabab loo saadaaliyo ama looga hortago dhimashadii axmaqnimada ahayd ee uu Geedi Aadan u gaystay Idill Ahmed. Si kastaba ha ahaatee Guddigu waxay aqbaleen muhiimadda ay leedahay shaqada la bilaabay in wax lagaga qabto dabeecadaha qalafsan ee dumarka xaqira ama dhaawaca iyo in ay caawimo loo doonto adeegyada bixiya taageerada gaarka ah.

Qaybta Toddobaad: Soojeedinta iyo Qorshaha (Recommendations and Action plans)

Soojeedin	Baaxadda, ujeeddada soojeedinta i.e. magaalo ahaan anma gobol ahaan	Tallaabda u baahan in la qaado	Hay'adda Hoggaaminaysa	Guulaha ugu muhiimsan ee la gaadhay ee soojeedinta ka soo baxay	Wakhtiga la dhamaynayo
In lala shaqeeyo hoggaamiyeyaasha bulshada, uruurada bulshada iyo ururada diiniga ah si wax looga qabto dabeecadaha taban ee la xidhiidha awood iyo muquunis ee dumarka iyo hablaha lagu hayo	Hay'ado wadashaqayni ka dhexeyso (cross agency)	In lagala hadlo CSP iyo golayaasha caafimaadka bulshada (Public Health) iyo hoggaamiyeyaasha bulshada iyo diinta	Bristol Community Safety Partnership iyo Bristol City Public Health		Waa joogto
In la balaadhiyo ajendaha VAAWG, lana gaadhsiiyo bulshooyinka aan muuqan ee ay saamayso DV iyo SV, iyadoo la raacayo habka bulshad lagu awood-siiyo	Magaalada / Hay'ado wadashaqayni ka dhexeyso	In si fiican loo fahmo xidhiidhka wanaagsan, doorka qoyska iyo asxaabta iyo sida bulshada aan muuqani ay taageero u heli lahayd	Bristol City Council Public Health	Hawl bulshada lagu awood siinayo lana mid ah, kuna xidhan doorka ololeeyaasha FGM (FORWARD), Refugee Women of Bristol's women's rights resource iyo Forced Marriage iyo Crimes in the name of 'Honour' working group.	Waa joogto
Ololaha balaadhan ee magaalada oo dhan ku sabsan No Excuses campaign ayaa Bristol lagu qaadi doonaa si kor loogu qaado	Magaalada / Hay'ado wadashaqayni ka dhexeyso	In la baadho bulshooyinka ay sida xun u saamaysay ee khibrad aan wanaagsanayn kala kulmay,	Bristol City Council Public Health	Maalmaha ama taariikhda muhiimka ee ololaynta: May 2016; November 2016; February 2017	Barnaamij olole joogto ah

<p>waxyeelada qoysaska iyo galmada iyo in asxaabta lagu dhiirigeliyo iyo xubnaha qoyska ka mid ah si ay u soo gudbiyaan dacwooyinka waxyeelooyinka qoyska ka dhexdhaca. Shaqadan waxa si wadajir ah u qaban doona PCC iyo Zero Tolerance city</p>		<p>diyaarna u ah in wax lagala qabto.</p>			
<p>In si joogto ah dib-u-eegis loogu sameeyo heshiiska kirada dadka waaxda Guriyeyntu ka warqabto in ay yihiin ama ahaayeen kuwo jilicsan (ama waxyaabo badan u nugul)</p>	<p>Magaalada</p>	<p>In laga heshiiyo iyaasadda/habka hawlgalka shaqada (dib-u-eegis ku salaysan khatarta) iyo tababar ku saabsan hab cusub oo loo wada shqayn karo</p>	<p>Bristol City Council Housing Estate Management Service</p>	<p>Hab loo ururiyo xogta dib-u-eegista labad dhinac ee heshiiska kirada iyo tallaabooyin toos ah oo la qaaday kadib markii booqasho dhacday - tussaalle dacwad laga soo gudbiyay arrin ku saabsan waxyeelo qoyska ka dhexdhacday ama qodob kale oo la jebiyay. Dib-u-eegista heshiiska kirada waxa loo diwaangelin karaa macluumaad ahaan, talo iyo tusmo ahaan laakiin tani waa inay caawisaa kireystaha si uu adeeg u helo (haddii mustaqbalka loo baahdo).</p>	<p>1da December 2016</p>

<p>Dhamaan shaqaalaha waxa la xusuusin doonaa iyadoo la isticmaalayo kulanka maareeyayaasha iyo tababarada boodh-ka-tumista ah (refresher training) in loo baahanyahay in si hakad la'aan ah kireystayaasha jilicsan ama aan awoodin loogu gudbiyo hay'adaha taageerada bixiya ee ku haboon, gaar ahaan bilowga heshiiska kirada iyadoo hoosta laga xariiqayo in loo gudbiyo kooxda kirada guryaha goglan</p>	<p>Magaalada</p>	<p>Kulamo macluumaad bixin ah iyo tababaro la siinayo si loo dhaqangeliyo soojeedinta iyo in la hubiyo in shaqaaluhu ay ogyihiin in ay aqoonsan karaan qofka aan awoodin iyo in hababkii loo gudbin lahaa ay diyaar yihiin. In la qabto Housing Support Register Refresher Training haddii loo baahdo.</p>	<p>Bristol City Council Housing BCC Estate Management Service & Rent Management Service</p>	<p>Kulamo macluumaad bixin ah oo dhamaan shaqaalaha loo qabanayo iyo tababar daba socda oo ku haboon oo loo qabanqaabiyay si loo hubiyo in codsadaayaasha aan awoodin isla markiiba loo gudbiyo hay'adaha taageerada bixiya ee ku haboon, gaar ahaan bilowga heshiiska kirada iyo weliba khaas ahaan kooxda guryaha goglan</p>	<p>1da December 2016</p>
<p>Shaqaalaha waaxda caafimaadka TBda (TB Clinic) in la xusuusiyo siyasadda shaqada ee bedqabka (safeguarding policy) marka laga hadlayo ama la tixraacayo bukaanka waxyaabo badan u nugul (vulnerable patients)</p>	<p>Magaalada</p>	<p>Kulamo macluumaad bixin ah oo maareeyayaashu qabtaan iyo tababaro</p>	<p>UHB Safeguarding</p>		<p>1da December 2016</p>